


# Ku saabsan Soohdimaynta

## Waa maxay soohdimayntu?

Magacyada soohdimayntu waxay si buuxda u qeexayaan xeerarka iyo sharciyada xukuma horumarinta hantida iyo sida loo isticmaali karo.



## Yaa gaara Go'aamada Soohdimaynta?

Go'aannada soohdimaynta waxaa sameeyaa Golaha Magaalada Rochester, Guddiga Qorshaynta Magaalada iyo Guddiga soohdimaynta, Guddiga Racfaanka ee Rochester, iyo Kooxda Horumarinta Bulshada.

Magaaladu waxa kale oo ay shaqaalaysiisaa Xidhiidhka U Hogaansanaanta Soohdimaynta kaas oo siiya oggolaanshaha soohdimaynta qandaraaslayaasha , xoojiya u hoggaansanaanta, oo siiya hagitaan iyo waxbarasho dadka degan xeerarka soohdimaynta.

# Nala soo xidhiidh Su'aalaha aad ka Qabto Soohdimaynta



4001 West River Pkwy NW Suite 100  
Rochester, Minnesota 55904

507.328.2600  
CommunityDevelopment@  
rochestermn.gov

[www.rochestermn.gov/  
government/departments/  
community-development/  
planning-zoning](http://www.rochestermn.gov/government/departments/community-development/planning-zoning)



Fiiro gaar ah. Haddii aad rabto turjumaad bilaash ah ama aad u baahan tahay hoy, wac 507-328-2600.

# Maagalada Rochester

## SOODHIMAYNTA 101 & Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo (FAQ)

### Waaxda Qorshaynta iyo Soohdimaynta Magaalada Rochester

waxaa ka go'an inay ilaaliso dabeecadda bulshada, ilaalinta xuquuqda mulkiilayaasha hantida, iyo hubinta caafimaadka, badbaadada, iyo daryeelka guud ee dadka ee la xidhiidha isticmaalka dhulka.

(Horumarinta Bulshada Rochester)

 ROCHESTER  
**COMMUNITY  
DEVELOPMENT**

# Su'aalaha Soohdimaynta ee Inta Badan La Isweydiyo


iyo meesha laga helo maclummaad dheeraad ah oo ku jira UDC iyo Xeerka Degmada Xeerka Horumarinta Midaysan (UDC) waa xeerka soohdimaynta Rochester. Xeerka degmada Rochester waa ururin xeerar guud. Si wada jir ah ayey u nidaamiyaan, iyo waxyaabo kale, sida hantida gaarka ah loo horumarin karo loona isticmaali karo.

## Ma dhigan karaa barxaddayda hore?

Qaybta UDC 60.400.080J.5 ma oggola in baabuurtla dhigto aagga hore ee degalka.

## Gaadhi aan ruqsad Lahayn ama aan shaqaynayn ma loo ogolyahay jidkayga?

Qaybta UDC 60.400.080K.4 ma oggola in baabuurtla aan ruqsada haysan ama aan shaqaynayn in lagu kaydiyo ama la dhigo meel kasta oo loo soohdimeeyay hanti ahaan, ilaa dhisme gebi ahaanba xidhan mooyee.



## Ma ku lahaan karaa baabuur ganacsi jidkayga?

Xeerka Magaalada 134.23 wuxuu qeexayaan in aan baabuur xamuul ah ama baabuur ganacsi oo miisaankoodu ka badan yahay 3/4-ton (680 kiloogaraam, 1500 rodol) aan la dhigi karin degmo kasta oo la deggan yahay in ka badan afar saacadood oo isku xigta.

## Waa maxay xaddidaadaha baarkinka Baabuurta Madadaaladda (RV)?

Qaybta UDC 60.300.020G.14 waxay qeexaysaa xaddidaadaha baarkinka baabuurtla madadaaladda (RV). Degganeyaasha waxaa loo ogolyahay in ay dhigtaan RV-yada jidatka haddii shuruudo gaar ah la buuxiyo.

## Dayr intee le'eg ayaan yeelan karaa?

Dayrarka ka sarreya 6-fiit waxay u baahan yihiin Shahaadada Soohdimaynta iyo dayr ka badan 7-fiit wuxuu u baahan yahay Oggolaansho Dhisme. Ka tixraac Qaybta UDC 60.400.060E wixii maclummaad dheeraad ah ee ku saabsan agabka iyo goobta.

## Ka waran haddii deriskaygu leeyahay "qashin iyo/ama xashiish"?

"Qashin iyo/ama xashiishka" waxay noqon karaan khatar caafimaad ama dadweyne. Faahfaahinta, ka tixraac Xeerka Dawladda Hoose Qaybta 8-3-5, kaas oo tilmaamaya in qaybaha bannaanka ee guryaha ay tahay in loo ilaaliyo si habboon oo guud ahaan xaaladdoodu wanaagsan tahay.

## Muxuu Xeerku ka yidhi boodhadhka?

Qaybta UDC 60.400.110H.1 waxay qeexaysaa ereyga "banner" waxayna caddaysaa cabbirro gaar ah iyo xaddidaadyo la xidhiidha isticmaalka boodhadhka gudaha magaalada Rochester.

## Intee jeer ayaan heli karaa iibka garaashka?

Qaybta UDC 60.300.020H.4 waxay oggolanaysaa wax ka badan saddex garaash sannadkiiba hal guri. Muddada iibku kama badnaan karo saddex maal mood taariikhed oo xidhiidh ah.

## Waa maxay shaqada guri?

Shaqo ama xirfad kasta oo faa'iido leh oo uu ku hawlan yahay degane guri ku yaal ama ka yimid qaybta guriga. Shuruudaha ay tahay in la buuxiyo si loo ansixyo Shaqaaluhu waxay ku jiri karaan Qaybta UDC 60.300.020G.12.

## Ma u baahanahay oggolaansho barkadda dabaasha?

Inta badan, Shahaadada Soohdimaynta ama Oggolaanshaa Dhismaha ayaa loo baahan yahay barkadda dabaasha. Heerarka gaarka ah iyo goobta la oggol yahay ee barkadda waxaa laga heli karaa Qaybta UDC 60.300.020G.19.

## Halkeen dhigi karaa weelasha qashinka adag ee lagu kaydiyo qashinka?

Xeerka degmada Qaybta 12-10-3 wuxuu dhigayaa in weelasha qashinka aan la dhigin dariiqaa lagu socdo maalmaha la qaadayo waana in meesha laga qaada 24 saacadood gudahood marka la qaado.

## Waa maxay heerarka kaydinta ee bannaanka?

Qaybta UDC 60.400.090B waxay nidaamisaa saamaynta muuqata ee keydka qashinka aan la xakameynin, badeecoyinka, agabka, ama qalabka ay ku yeelan karto guryaha ku dhow ama xuquuqda-jidka dadweynaha ee ku dhow.

## Waa maxay xeerarka dhismayaasha, qaababka, ama isticmaalka agabyada dheeraadka ah?

Dhismayaasha, qaababka, iyo isticmaalka dheeriga ah ee guryaha la dega iyo kuwa aan deganayn labadaba waa inay buuxiyaan xeerarka dhererka, goobta, saamiga dhulka, iyo in ka badan. Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara garaash, daashka, baabuurka, ama gazebo. Eeg Qaybta UDC 60.300.020G.

## Waa maxay Qaybaha Hoyga ee Dheeraadka ah (ADUs)?

Qaab-dhismeed ku dheggan ama ka go'an, oo ku yaal isla goob kaas oo siiya shuruudaha aasaasiga ah ee nolosha, hurdada, karinta, iyo nadaafadda. RV-yada, tareelka safarka, xerada, ama baabuur la mid ah waa inaan loo isticmaalin ADU ahaan.



## Waa maxay Kulanka Maclummaadka Xaafadda (NIM)?

Waa shir loogu talogalay in lagu siiyo dadka degan xaafadda meelaha horumarka laga wado. Waa fursad lagu codsado maclummaadka ku saabsan horumarka la soo jeediyay oo lagu siiyo ra'yi-celin iyo talo soo-saarayaasha soo jeedintooda.

## Goorma ayaan u baahanahay shahaadada soohdimaynta?

Qaybta UDC 60.500.060A waxay tusinaysaa in loo baahan yahay shahaado soohdimaynta marka qayb kasta oo ka baxsan goobta wax laga beddeelo oo la xiriirta kicin, dhisme, ama dibuqaabaynta dhismo ama qaab-dhismeed, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: daadin yar, shabiir, ballaarin jid baabuur, iwm.